



Iimaanku wuu ku duugoobaa uurkiina sida ay u duugowdo marada cusubi, Ilaahey waydiista inuu iimaanka ku cus boonaysiiyo qalbigiina

Cabdullahi Binu Camar Binu Caas Allaha ka raali noqdo asaga iyo aabihiye wuxuu yidhi: Nabigu SCW wuxuu yidhi: Iimaanku wuu ku duugoobaa uurkiina sida ay u duugowdo marada cusubi, Ilaahey waydiista inuu iimaanka ku cus boonaysiiyo qalbigiina.

[Xadiis Saxiix ah.]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu sheegay in iimaanku ku duugoobo qalbiga muslimka, wuxuu u duugoobaa sida marada cusubi ugu duugawdo isticmaalka dheer. Taas waxaa u sababa cibaadada oo laga gaabiyo ama iyado macaasi lala yimaado oo naftu waxay jeceshahay la muqurto. Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu inoo sheegay inaan Ilaahey ka barino inuu iimaankeena inoo cusboonaysiiyo, inago gudanayna waajibaadka lana imaanayna dikri badan iyo istiqfaarta.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65020>

